Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Barlamaanka Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 6-aad

Documentiga kalfadhiga 6-aad kulankiisa:4-aad Tr:18.5.2015

Kalfadhiga 6-aad

Kulankiisa:4-aad, sacada furitanka.12:45 gh, sacada xiritanka.2:30 gd.

Guntinta: 161 xildhibaan.

Ajendaha:

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Qaybinta Hindise Sharciyeedka Shaqaalaha Ajnabiga ah**
4. **Qaybinta Hindise Sharciyeedka la dagaalanka Argagaxisada**
5. **Dooda Motionka Dhismaha Golaha Wakiilada Maamul Gobolleedka KMG ee Jubbooyinka(jubba)**

Shir-Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,xildhibaano Ajendaha manta waxaa ku dhacay isbedel maadama waqtiga is guray,waxaan codsanayaa in ajendaha laga saaro qodobadan.

F-3.Dhaarin xildhibaan cusub dib ayaan u dhiganay,waxaan doonayaa in la iigu

Yeero 3da oday dhaqmeed ay arintan qusaysay ,waa in uu ii kena wasiir ceymoy

Si aan u wada hadalno.

F-4.Dhageysiga Warbixinnada Degaan –doorashooyinka.

F-5.Akhrinta 1aad Hindise Sharciyeedka Warbaahinta,fadhiga soo socda ayaan

Ku darsaneynaa.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu xildhibaanada ka codsaday in ay ajendaha ansixiy-aan weyna ansixiyen.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha wuxuu u yeeray xildhibaanadii soo gudbiyay mooshinka ka dhanka ah Golaha wakiilada Maamul Goboleedka KMG Jubba in ay akhriyaan.

Xildhibaan:Samaan Sheekh Daahir,wuxuu Golaha ka hor akhriyay mooshinkii ay soo gudbiyeen xildhibaanada Barlamaanka Federaal Soomaaliya.

- Ujeeddo:Soo jeedin ka dhan ah Barlamaanka Lagaga Dhawaaqay Maamulka KMG jubba.

  Anagoo ah xildhibaanada mgacyadooda hoos ku saxiixan yihiin kana tirsan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

  Waxaan halkan Baarlamaanka sharafta leh ugu soo gudbinaynaa soo jeedin ka dhanka ah waxa uu maamulka KMGs jubba ugu yeeray Barlamaanka ee 15 Apriil 2015 uu kaga dhawaaqay magaalada Kismaayo.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,sida uu qabo Xeer-Hoosaadka ma jir-aa xildhibaan ayidaya mooshinkan la akhriyay.

Xildhibaan:Maxamed Cumar Dalxa,wuxuu soo jeediyay,mooshinka uu akhriyay xildhibaan samaan waan ku raac sanahay iyada oo mid-mid loo gali doono maa-mulada kale ee wadanka ka jira waayo waxyaabo badan baa ku hoos qarsoon .

1.Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,waxaan idiin xusuusinaya xildhiba-Ano habka doodida.

Doodida iyo anshaxa Qod.30-aad, ee Xeer-Hoosadka xildhibaan walba wuxuu Xaq u leeyahay in sixor ah u cabiro fekarkiisa lana xormeyo Rai'yigiisa marka Golaha laga dhex doodayo.

2.iyadoo la fulinayo faqrada kor ku xusan xubnaha golaha waa in si hagaagsan ay ugu dhaqmaan qodobada soo socda.

A. xubin kasto waxaa laga doonayaa in fikirkeeda u cabirto si kooban oo cad iya-O aan ka baxeyn qodobka laga hadlaayo laguna cel-celin ereyo isku mid ah ilaa Liyana waqtiga loo qondeyay.

B. xubin walba waxaa waajib ku ah in ay run ka sheegto qodobka uu ka hadlayo

C. xubin kasto waxaa waa jib ku ah in ay kenin wax xiisad kicinaynin,qal-qal gali-Naynin wadanka iyo shacabka midnaba .

D.xubin kasto waa inay ilaalisaa sharafta iyo xasaanada aqalka xubnaha iyo hay'-Adaha kalaba.

E.soo jeedinta xubin walba waa in ay ku saleysan tahay mabi'diida fikradaha ku Taageerayno ama kaga hor imaneyno iyadoo lo dayo xunnaha.

F. xubinta cabiraysa fikirkeeda laguma sameyn karo dhex gal sida,ganuunac,qayl-O,sacab,foori, iyo wax kale oo dhaqan xuma ah.

G.xubin ma hor keeni karto golaha Rai'yi aan waa faqsanayn ajendaha fadhiga Hadaan u ogolaan guddoomiyaha.

H.xubin kama bixi karto fadhiga markii ay jeediso fakar keeda.

I. xubin kuma qeybin karto dukumenti aan guddoonka u fasixin.

J. xubnaha waxaa ka reeban in ay qalalaaso ku sameyan Barlamaanka iyo agagar-Kiisaba.

K.waxaa ka reeban xubnaha in ay u il jabiyaan martida golaha fadhisa.

L.waxaa reeban in laga boxo fadhiga marka uu guddoomiyaha hadlayo ama ay Socoto codbixin.

M.waxaa reeban in lala yimaado calaamado qoraalo,suugan,dhawaaq muujinayo Is hortaag golaha kulanka.

N.xiliga guddoomiyaha hogaaminayo shirka looma tagi karo,waxna looma sheegi Karo xokeynta ayaa wixii qoraal ah loogu dhibayaa qodobkaasi waxa weye.

F-3.xubinta rabta in ay hadal jeediso waxay raaceysa talaabooyinka soo socda.

A.xubin walba waxey hadalkeeda ku bilaabeysaa mahadsanid guddoomiye.

B.waxay isticmaalaysa marka ay tilmaameyso xubin kale, xildhibaan,mudane,mar-Wo marka ay sheegeyso xubin ka mid ah golaha.

C.xubinta rabta in ay hadasho waxey taageysaa gacanta iyadoo ayna qeylin, buuqi N ama ficil kale sameyn.

D.xubin ma hadli karto ama calaamad kuma muujin karto ra'yigeeda hadii uusan Guddoomiyaha u ogolaan, ugu danbeyntii xubintii hadashada iyadoo guddoomi-Yaha u ogolaan wuu ka joojinayaa hadalka,wuxuuna siinaya cidii ku xigtay,taasi

Waa xeer hoosadka Qod.30-aad.

Guddoomiyaha Golaha,waxaan codsanayaa intii rabta in ay hadasho waa in ay is qoraan,mudanayaal waxa is qoray 39 xildhibaan,mudanayaal hadii manta dooda dhamaan weyso in aan dhameys tiri doono maalinta bari ah,iyo wixii manta haray in aan u rarno ajendaha kale maalinta talaadada guddiga joogtada ayaa so go'aminaya.

Xildhibaan:Maxamed Nuur Xagafe,wuxuu soo jeediyay,guddoomiye mahadsanid waxaan donayaa in aan qod-qodob ugu hadlo,waxaan rabaa in umada soomaliyeed ay na ogaato in uu saxyahay iyo in uu qalad yahay sidaasi darted Qod.4aad ee Dastuurka wax kasto oo la sameynayo in lagu saleeyo Dastuurka,markaan aragnay Qod.46, F-1,2,3aad, arintaas waa qodob Dastuuri ah,tan laga doodayo wa degan iyo shacab ta shaday oo labo sano soo waday oo barlamaan sameystay oo ka gudb ay 4.5 oo u sameystay deegan arintaas waxay burinaysaa matalaada shacabka anaga shacabka ayaan matalnaa waxay beesha caalamka ku waa faqday oo dowla da Federaalka guddoomiyay Wasaaradda Arrimaha Gudaha goob jog ayay ahayd marka la xulayay Barlamaanka Jubba cabasho noogama imaan.

Xildhibaan:C/laahi Garuun,wuxuu soo jeediyay,arrinta jubba sida la soo sheegay degmooyin badan baa laga tagey hadii doorasho timado xagey ka soo galayan tas cadaalad maahan wey wanag santahay in la dhiso barlamaan laakiin wixii cadalad daro ku bilowda waxaa u dambeyn doonta bur-bur wixii qaldan waa in la saxo.

Xildhibaan:C/fataax Nuur Matan,wuxuu sheegay,aniga waxaan ka mid ahay xildhibaanada taageersan mooshinka laga keenay jubboyinka shacabka degan in ay tabanayan dhibatooyin waxa la yiri barlamaan ayan dhisnay oo lagu salaynin dega ankas dadka degen oo la afduubay shacabkii degana markii lamagacabay Madaxweynaha jubba in si qalad lagu dhisay la hareer maray sharciga,waxa ka muuqato cadaalad daro waa u mad aan haysan Dastuur oo sharci qabin waa in dib loogu noqdaa waa meel amni daro ay ka jirto oo dadka lagu layo.

Xildhibaan:Maxamed C/dulle Gesay,guddoomiye mahadsanid,qof kasto waa in u u qabo Dastuur iyo xeer hoosad,sacada aad shirka furtay,waxaan ka hadlayaa in ay wax noo sax maan anagoo isku meel u wada socona,aniga waxaan ka mid ahay

guddiga arrimaha guddaha kismayo iskay ayan u tagey waxan is aragnay Axmed islaan markaan wada hadalnay wuxuu ugu yiri,aniga waxaan ahay fulinta madaxe-eda waxaad wax iga wey diin karta wixii wasiir ku saabsan,wixii ku saabsan xildhi-baan iyo oday dhaqameed iyo ergo, waxaad wax ka weydineysa (Gabra) waxaan ka xumahay (Gabra) waa nin Ajnabi ah waa dowlad daris nala ah xubin ka mid ah waa xubin siyaasada u matala (IGAD) in uu anaga namaamulo oo shacabkeena maamulo xaq uma laha,masu'lka ugu sareyay maamulka jubba ee lagu aaminay in uu yiraahdo (Gabra) ka taliya waa gaf,mudanayaal waxa aad difaaceysan wax gac-antiina ku jira maahan maamulka isaga ubaahan in la xoreeyo,in la toosiyo,in awood lasiiyo taasna waxey u talaa xildhibaanada Federaalka soomaaliya.

Xildhibaan:Muuse Sheekh Cumar,wuxuu soo jeediyay, in aan akhriyo qodob Dast-uuri ah,Qod.61,f-1,2aad, xubin kasto oo ka mid ah labada aqal ee Barlamaanka federaalka marka ay xilkeeda ay gudanayso waa in ay ku shaqeyso sida danta qaranka ku jirto,waxan ka cudur daranaya ciidamada Amison oo halkan ka joogo ciidan badan oo IGad ka haysto mandayd,in la yiraahdo IGAD aya Barlamaanka faragalin ku sameysay arin ku habon maahan barlamaanka,waxan ka mid ahaa dadkii lagu casumay markii la ansixinayay barlamaanka jubba Ergada waxay ahay d 550 Ergo Iyo oday dhaqameed ka kala yimid deeganada juba lan,Dastuurka jubba lan waa yalaa qofkii rabana waa la siinayaa.

Xildhibaan:Cali Nuur Boodaye,wuxuu soo jeediyay,barlamaanka inta aan joognay oo aan qaranka u shaqeynaynay waa maalintii aan ugu rajo fiicnayn barlamaanka waa hay'ada kaliya ee u hartay oo dowliga ushaqeyso ilaalinta danta qaranka ayay u u tagan tahay,iyado barlamaanka u soo hoyatay sharaf iyo shacabka soomaaliyeed waa in la saxo khaladadka waxa la yiri IGAD ayaa faragalin nagu hayso,IGAD waxey ka shaqeysaa horumarka,aan u yeerno Wasiirka Arrimaha Gudaha si su'aalo lo wediiyo waxan haysana fursad aan ka fai'daysano hadii laga fai'daysan waayo soomaaliya mugdi ayay galaysaa.

Xildhibaan:C/laahi Goodax Bare,wuxuu soo jeediyay,waxaan u mahad celinayaa xildhibaanadii mooshinkan xil iska saaray barlamaanka iyo shacabka waxaa u soo hoyatay sharaftoda iyo karamadooda,waxaa muuqata in qabiiladii daganaa aan wax lagu qaybsan,oo dadkii fac-ka fac deeganka ahaa lagu kala daadsho,manta wa

Maalimtii barlamaanka xaqa u istaagi lahaa,waxa ka dhacay meeshas waxay gacan siineysaa al-shabaab.

Xildhibaan:Maxamed Muuse Borow,wuxuu sheegay,waxaan tagersanahay moo-shinkan oo ah xaq iyo cadaalad,madaxda maamulka mayaqanan dadka siday u kala deganyihiin talada haday gacanta nogu jirta haday faraha ka baxdo cadow ayay gacanta u galeysaa.

Xildhibaan:Maxamed Cumar Dalxa,wuxuu soo jeediyay,Jubbalan in maamul lo sa-Meeyo waxan filaa in laysku racsan yahay dowlada dhexe cadaalad darada ku ba-datay waxey ku fatahmayaan maamul goboleedyada la sameynayo,waxaana sab-ab u ah dowlada dhexe,waxaan dowlada dhexe ogeyn ma socdan in shacabka soomaaliyeed ee degaankas lagu maamulo awood sheegasho,waxaa layiri yaa isku haysta kismayo waxa isku haysta ku dhashay,ku dhaqmay,ku dhintay, waxan soo jeedinayaa in barlamaanka soomaaliyeed in ay wax ka qabtaan cadaalad darada ka jirta maamulka jubba.

Xildhibaan:Axmed Aabi,wuxuu sheegey, mudanayaal waxan idiinka cosdanaya in leyska daayo caadifada,barlamaanka sharafta leh in uu u dhaqmin sida boolis oo kale,waxa la sheegey in jubbalan aysan laheyn Dastuur,waxa loo sameyay inta aan barlamaan la dooran, caleemasaarkii waxaa ka qeyb galay xildhibaano garaya 40 waxaa goob joog ahaa wasaarada arrimaha gudaha bilow ilaa dhamad wasaarada warbixin ayay ka diyaarisay waa in naloogu yeera wasiirka arrimaha gudaha.

Xildhibaan:Aweys C/laahi,wuxuu soo jeediyay,dhamman xildhibaanada federalka soomaaliya waxey matalan shacabka soomaaliyeed,xildhibaanada xaq bey u leey-ihin in ay soo jeediyan fikirkooda ee cadow iskuma ahan,sida uu farayo Dastuurka xildhibaanka waa in uu gutaa waajibka loo soo idmaday,arrintan hada mabilaaban waxey bilabatay maalintii itoobiya lagu soo aas-aasay oo cadaalad daro ahayd, wa in la yiraahdaa sixee wax u saxnaa,madaxda dowlada ayaa u dhaaratay dalka,sha-cabka,diinta,maahan in ay ka qeyb gasho meel dulmi ka jira.

Xildhibaan:Xamsa Sheekh Xuseen,waxey soo jeedisay,xildhibaano xaq baad u leedihiin in aad rai'yigiina soo jeedisan,jubbalan 9bilood, ayay fadhiyeen sida ay u sameysan lahayen Dastuur KMG wey sameystan iyado wax ku qeyb saden degan

dhamaan beelaha soomaaliyeed,hadii la yirahdo maalin walbo looma dhama ma wanagsana hadii qalad jiro waa in la saxaa ee maahan in wax la bur-buriyo.

Xildhibaan:Shuuriye,wuxuu sheegay,xildhibaanadii keenay mooshinkan xaq bay u leeyihiin in ay cabiraan fikirkooda waa masu'liyiinta dalka waxan kadodeyno in aan ku saleyno wax rasmi ah oo faido ku jirto wey wanagsan tahay in wax la saxo mooshinkan waxa dhici karta in uu no horseedo bur-bur,jubbalan waa in ay tagto 5o xildhibaan si ay xaqiiqada u soo ogaadan sida wax u jiraan maahan in aad dad tashaday oo deegan wax ku qeyb saday la yiraahdo waa sharci daro dowlada waa ka war qabtay waxan dowlada dhexe ogeyn masameyn jubba lan.

Xildhibaan:C/laahi Abshirow,wuxuu soo jeediyay,waxaan tagersa nahay mooshinkan ay keenan xildhibaanada barlamaanka federaalka,barlamaanada dhaman maamulada dalka ka jira waa in ay ansixiyaan Barlamaanka federaalka soomaliya, Hadii barlamaanka wax sixiwayo,goormay saxmayan,Qod.51,x.a, ee Dastuurka, Wuxuu leeyahay heer kasta ee xukuumadeed waa in ay heysata kalsonida iyo tagerada dadweynaha,jubba maheysato tagero shacab,aniga waxan tagey kismayo,waxan kulanay,Madaxweynaha Axmed Madoobe,wuxuu ugu yiri Barlamaanka jubba waxaa soo xulaya(Gabra) ma soo xuleyso soomaali,Xildh.Gesay waxa uu sheegayo waa sax,shacabka jubbalan uma dhama,waayo marka la firiyo Qod.46-aad,awoda is xukunku,waxay ka bilaabata kuna dhamata shacabka,waxa gaf ah in madaxweynihii jubba uu yirahdo meshan Gabra, soo xulayo xildhibaanada.

Xildhibaan:Maxamed Afaraale,wuxuu sheegey,dowlada soomaaliyeed kama qeyb qaadan waxa ka dhacay jubbalan waa la wada ogyahay,waxan ku dharanay kutub xildhibaankii yiri Amison ayaa na wardiyaysa ogolashahana ayay ku timid uma imanin in ay anga qabiil-qabiil noo kala daadiso,marka hore 3da gobol yaa is raacshay,afti lagama qaadin shacabka meelo qaarkod cadowga ayaa haysta,waa in sharciga la dhowraa, waa in wixii qaldan la saxaa, waxa la yiri igad ayaa soo xuleyso ma waxay taqaana siday soomaalida u kala degto deeganada waa in saxa.

Xildhibaan:Daahir Aamiin Jesow,wuxuu soo jeediyay,aniga waxaa ka mid ahaa xil-

Dhibaanada saxiixay mooshinka,anago 40 xildhiban ayan tagnay kismayo markii uu joogay Rai'sal wasaare saacid,wuxuu soo jeediyay,R/W in kismayo noqoto mel

dowlada federaalka ka talineyso,wax calamesar ah majirin, Axmed Madowe wuxu ku soo galay hogaamiye meel Madaxweyne loogu aqoon saday majirto, Madaxweynaha Federaalka ayaa tagay kismayo oo yiri laga bilabo manta waxaa lagugu yer

Ayaa Madaxweyne, taasna sharci ma noqoto waa in aan raacyo nidaamka qofna qof kama dhigi karo Madaxweyne waa doorasho gobolada ahato ama tuulo,IGAD ma ogolin in ay wax ka soo dhisto goboladii aan anaga ku dhalanay,waxaa sharaf dhac ah in uu maamulada la dhisayo uu nin ajnabi ah ka taliyo mana yeelayno.

Xildhibaan:Hiiraale,wuxuu soo jeediyay,hadii la yiraahdo qof walba waa cabanayaa waxba ma dhismayaan jubba hada waa dhaqaqday hadii qaladaad jiro waa in la saxaa wadankana dib loo dhisaa si shacabka dhibka ugu baxaan.

Xildhibaan:Jaamac Oday,wuxuu soo jeediyay,mudanayaal Dastuurka inoo qoran umada Soomaaliyeed baleh,waajib ayaa inaga saran jubba qalad ayaa ka dhacay waa in la saxa,waa in leyska dayaa caadifida,jubba sida lo dhisay wey qaldan tahay soomaali-lan sida lo dhisay wey qaldan tahay,putlan wey qaldan tahay,aa nirahno jubba wey qaldan tahay nala saxa hadii mid walba hadlo waa laga fiican yahay.

Xildhibaan:C/raxmaan Xoosh jibriil,wuxuu soo jeediyay,waxa la keenay mooshin mahan ee waa Risolishan,maxa yeelay mooshinka waa hadad wax diidi karto ama ogolaan karto,waxa hada ka socda waa wax u yaala dowlada federaalka,hadii aan go'aan ka soo saarno barlamaanka jubba ma is tageyso,waxaa jira cabasho oo ka jira gobolada dhamaan loo sameynayo maamulada,waxba hada sameysan aan ku dadaalno sidii an ku sixi lahayn oo qaladaadka looga saari lahaa.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,ilaa hada waxaa hadashay ilaa 19 xildhibaan,inta xildhibaan harsan waa 20 xildhibaan,mudanayal waxa inoo yal shuruuc badan bari waan shaqeynayna inta harsan ayaan dhameystiri doona.

Kalfadhiga 6-aad kulankiisa:4-aad,uu shir Guddoominayay,Guddoomiyaha Golaha Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan,uu sheegey in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 2:30 gh.